


Wadajir si loo helo caafimaad

Agab loogu talagalay CHW yadda si ay u yeeshaan wadda hadalo soo jeedin leh oo ku saabsan tallaalada

Aggabkan waxa laga curiyey jawaab celin ka timi Community Health Workers (CHWs, Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada). Waxa ay ka koobantahay xog, waxqabadyo iyo ilo laysku halayn karo si aad u gala hadli karto macaamiishaada muhiimada tallaalada iyo waddooyinka kale aad ku ilaalin karto caafimaadkooda.

Cidna ma doonayso in ay u xanuunsato xanuun caabuq, oo uu ka mid yahay COVID-19. Ka CHW ahaan, macaamiishaadu way aaminsanyihiin, aggabkanina waxa uu kaa saacidayaa in aad wadaagto xogta caafimaadka ee iyaga ugu dheefta badan.



Toolkit contents:



Xaanshiyaha Talooyinka

Xaanshiyahan xaqiiqada marka la jaleeco waxa ku jira xog heer sarre ah oo ku saabsan tallaalada iyo wadahalada laga yaabo in aad iyaga ka hayso. Waxa aad awooda in aad si degdeg ah u gasho xaanshiyahan wixii tilmaam ah iyo qoddobada hadalka ee macaamiisha aad la leedahay.

Mawduucyada waxa ku jira;

- **WADAAGISTA XAQIIQOYINKA** dhiirigeliya tallaalka iyo dabeecadaha kale ee caafimaadka leh
- **ISTICMAALISTA CODKA KU HABBOON** marka aad ka hadlayso tallaalada
- **WAX KA QABASHADA WALAACYADA INTA BADAN LA ARKO** ee laga yaabo inay qabaan macaamiishu
- **IXTIRAAMISTA QIYAMKA** adigoo kor u qaadaya caafimaadka



Haggayaasha wadda hadalka

Ku celceli waxa aad oron karto marka lagu jiro wadda hadalada macaamiisha.

Qaybtan waxa ku jira:

- **WADAHADALO TUSAALE AH** oo u dhaxeeya CHW iyo macaamiil kala duwan
- **CODAD DUUBAN** oo muunad wadda hadal ah
- **XAASHI SHAQEED WADDA HADAL**, si aad u qorto jawaabahaaga gaarka ah iyo in aad ku celceliso xirfadaha wadda hadalka



Kaadhka boorsada jeebka oo la daabici karo oo ay la socdaan tilmaamo wadda hadal.

Xor baad u tahay in aad la wadaagto macaamiisha haddii ay doonayaan in ay bilaabaan wadda hadalooda gaarka ah.



Wadahadalo

Kuwani waa goosgoos muuqaalo ah oo ah xubno lagu kalsoonyahay oo bulshada ah oo ka hadlaya badqabka iyo muhiimada tallaalada. Adigu kuwan daawo ama la wadaag macaamiisha.



Su'aalaha inta badan la is weydiyo

Kuwan waxa ka mid ah su'aalaha badanka ka yimaada CHW yadda, sida:

- Sideen wax uga qabtaa walaacyada diinta ku salaysan ee macmiilka?
- Sidee u sharaxaa COVID ka Dheer?
- Sidee uga hadlaa tallaalada la xidhiidha caruurta iyo uurka?
- Sidee wax uga qabtaa walaacyada macmiilka ee diimeed?
- Iyo in kale